REGION BLEKINGE

# Qalabka kaalmada – macluumaadka ku saabsan dadka bukaanka ah

Waxaa laguu qoray qalabka kaalmada oo ay kuu qoreen shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee ka tirsan adeegyada caafimaadka iyo daryeelka ee mid ka mid ah degmooyinka Blekinge ama Gobolka Blekinge. Qalabkani mid waa **amaah/deyn** ugu ah adiga, waxaana iska leh Xarunta qalabka kaalmada (Hjälpmedelscenter), ee Gobolka Blekinge. Haddii aad rabto inaad wax ka beddesho sida uu yahay ama ay jirto sabab kale oo aanad ku qanacsanayn qalabka, la xiriir qofkii kuu qoray. Adiga laguuma ogola inaad wax hagaajiso ama isbeddel ku samayso qalabka.

## Isticmaalka iyo mas'uuliyadda

Waxaa waajib kugu ah inaad raacdo waxa ku qoran buugga isticmaalka (bruksanvisning) iyo tilmaamaha aad ka hesho qofka kuu qoray qalabka. Waa inaad si taxaddar leh u ilaalisaa qalabka aad amaahatay, taas oo macnaheedu tahay inaad nadiifiso, u isticmaasho sida ku xusan tilmaamaha lagu siiyey, isla markaana aad u kaydiso si aanu u lumin ama aanu u noqon mid la xado ama la waxyeelleeyo.

Haddii ay qalabka waxyeello soo gaarto, lumo ama la xado, waxaa lagaa dalban karaa magdhow haddii aad dayacday (aanad si taxaddar leh u ilaalin) qalabka. Sidoo kale waxaa iyaduna la mid ah haddii aad si khaldan u isticmaasho ama u daryeeli weydo qalabkaaga.

Haddii ay qalabka waxyeello soo gaarto ama uu lumo, waa inaad ku wargelisaa qofkii kuu qoray qalabka. Haddii la xado, waa inaad sidoo kale u gudbisaa warbixin booliiska

Qalabka kaalmada badanaa waxaa loo tixgeliyaa hanti guurto ah markay noqoto caymiska gurigaaga. Haddii qalabku qaali yahay, waxaa lagugula talinayaa inaad la xiriirto shirkaddaada caymiska si aad u hubiso in qiimaha qalabka ay daboolayso shirka caymisku. Haddii aad rabto inaad ogaato qiimaha caymiska ee qalabkaaga, waxaad la xiriiri kartaa adeegga macaamiisha ee Xarunta qalabka kaalmada (Hjälpmedelscenter).

Xarunta qalabka kaalmadu (Hjälpmedelscenter) ama Adegga iyo- daryeelka caafimaadku ma bixiyaan magdhow ku saabsan waxyeellada ka dhalata guriga dhexdiisa ama deegaanka marka la isticmaalayo ama la kaydinayo qalabka kaalmada.

Laguuma oggola inaad qalabka amaahiso qof kale, iibiso, dammaanad ahaan u dhigato (rahanto), ku wareejiso ama aad ka kirayso dad kale.

## Dayactirka

Haddii uu qalabku xumaado, waa inaad soo sheegtaa si lagaaga caawiyo dayactirka. La xiriir qofka qalabka kuu qoray ama qaybta loo sheego markuu qalalbku xumaado (felanmälan) iyo adeegga farsamada ee Xarunta qalabka kaalmada. Dayactirku waa bilaash haddii qalabku u xumaado isticmaalka caadiga ah awgeed, waxaana fulinaya Xarunta qalabka kaalmada.



## Kharashaadka

Qalabka caawinta badankooda waxaad ku helaysaa amaah ahaan adigoon lacag bixin, laakiin waxaa jira qalab qaar ah oo la bixiyo lacag. Qofka qalabka kuu qoraya ayaa ku siin doona macluumaad ku saabsan arrintaas. Qalabku waa mid amaah ah xitaa haddii aad bixiso khidmadda dadka bukaanka ah loogu talagalay ama khidmadda sannadlaha ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan khidmadaha qalabka caawinta ee Blekinge waxaad ka heli kartaa bogga Patientavgifter i Blekinge – ee websaydka 1177.se.



## Guuritaanka

Haddii aad guurayso, waa inaad la xiriirtaa qofka qalabka kuu qoray. Haddii aad u guurayso gudaha gobolka Blekinge, xaaladaha inta badan waad qaadan kartaa qalabka kaalmada. Adiga ayaa mas'uul ka ah rarista iyo inaad qalabka caawinta u qaadato gurigaaga cusub. Waxaa ka reebban sariirta daryeelka caafimaadka (vårdsäng) iyo wiishka saqafka (taklyft), kuwaas oo ay shaqaalaha Xarunta qalabka kaalmada oo keli ahi ay furi karaan, rakibi karaan ama rari karaan.

Haddii aad ka guurayso gobolka Blekinge, waa inaad wakhti hore la xiriirtaa qofka qalabka kuu qoray. Qofkaas ayaa baari doona haddii degmadaada ama gobolkaaga cusub ay rabaan inay la wareegaan qalabka aad amaahda ku haysato, ama haddii ay qalab cusub kaa siinayaa goobta aad u guurayso. Haddii aad guurto adigoon ku wargelin qofka qalabka kuu qoray, waxaad mas'uul ka tahay inaad qalabka dib ugu soo celiso Xarunta qalabka kaalmada ee Gobolka Blekinge. Haddii aad qalabka soo celin weydo, waxaad ku khasbanaan doontaa inaad bixiso lacagta qalabka.



## Soo celinta qalabka

Marka aanad u baahnayn qalabka caawinta ama aad buuxin weydo shuruudihii laguugu oggolaaday qalabka, waa in qalabka nadiifiso oo dib u soo celiso. Waxaad la soo xiriiri kartaa qofka qalabka kuu qoray ama waxaad si toos ah u wici kartaa qorsheeyaha gaadiidka ee qaadaya ee jooga Xarunta qalabka kaalmada. Qalabka waxaa lagaaga soo qaadi doonaa gurigaaga si lacag la’aan ah.

Haddii aad qalabka soo celin weydo ka dib marka uu ku weydiiyo qofka qalabka kuu qoray, waxaa kugu waajibaysa inaad bixiso lacag magdhow ah.

## Macluumaadka xiriirka Xarunta qalabka kaalmada

### Adeegga macaamiisha

Tel: 0455-73 63 35 knappval 1, wakhtiga telefoonka 08.00-12:00 iyo 13:00-15:30 E-post: hjalpmedelscenter@regionblekinge.se

### Soo wargelinta waxa xumaada/adeegga farsamada

Tel: 0455-73 63 35 knappval 2, wakhtiga telefoonka 08:00-09:00 iyo 13:00-14:00. E-post: tekniskservice.hmc@regionblekinge.se

### Qorsheeyaha gaadiidka

Tel: 0455-73 63 35 knappval 3, wakhtiga telefoonka 08:00-12:00 iyo 13:00 – 15:30 E-post: transport.hmc@regionblekinge.se